# Kaydso Rasiidada Kharashaadka Waxbarasheed ee Carruurtaada




Haddii aad iibsanayso qalab dugsiyeedka carruurtaada ee ku jirta Xanaanadda Caruurta ilaa fasalka 12-aad, waxaad u qalmi kartaa barnaamijyadan canshuur dhaafka ah:

- Ka-jarista Waxbarashada K-12
- Canshuur dhimista Waxbarashada K-12

Kaydso rasiidadaada! Labada barnaamijba waxay kaa caawin karaan inay canshuurtaada hoos u dhigaan waxayna kordhin lacagta kuu soo noqon doonto markaad buuxineyso canshuurta dakhliga ee Minnesota.

## Kharashaadka Caamka Ah ee U Qalma:





- Qalabka dugsiga (qalin, warqad, xisaabiyaha)
- Qalabka waxbarashada ee kumbuyuutarada iyo kuwa lagu shubtaba  kumbuyuutarada
- Barista manhajka K-12 ee macallin aqoon u leh
- Kirada ama iibka qalabka muusikada ee lagu isticmaalo dugsiga

## Kharashaadka Aan u Qalmin:

- Qalabka dugsiga ee aan waxbarashada loo isticmaalin (boorsooyinka, tishuga, galalka)
- Dharka, oo ay ku jiraan dharka dugsiga (marka laga reebo dharka jimicsiga ee loo baahan yahay)
- Qadada dugsiga
- Safarka qoyska ee matxafka ama goobaha xayawaanka (suuga)



## Ma u qalmaa?

Si aad ugu qalanto dib uclelin canshuurta ama ka dhimis, labadan qodoba waa inay labaduba khuseeyaan:

- Waxaad iibsatay adeegyo waxbarasho ama qalab si aad uga caawiso waxbarashada carruurtaada
- Carruurtaadu waxay dhigtaan fasalka barbaarinta ilaa fasalka 12-aad ee dugsi dadweyne, gaar loo leeyahay, ama guriga

## Xaddidaadaha Dakhliga ee Barnaamij kasta:

**Canshuur celinta Waxbarashada K-12:** Dakhligaaga guud ee la hagaajiyay waa inuu ka hooseeyaa heerarka halkan lagu muujiyay. Haddii aad u qalanto lacag celinta, waa inaad soo gudbisaa canshuur celinta Minnesota si aad u dalbato soo celinta.

| Tirada carruurta u qalanta ee ku jirta K-12: | Dakhliga qoysku waa inuu ka yaryahay: |
|---|---|
| 1 ama 2 | $79,760 |
| 3 | $82,760 |
| In ka badan 3 | $85,760 oo lagu daray $3,000 ilmo walba oo dheeraad ah |

Ka-jarista Waxbarashada K-12: Ma jiraan xaddidaad dakhli oo loogu talagalay ka-jarista waxbarashada. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyadan iyo macluumaad kale oo muhiim ah oo canshuurta ah, booqo www.revenue.state.mn.us oo gal sanduuqa Raadinta ee K12 ama naga soo wac 651-296-3781 ama 800-652-9094.

# Dib ucelinta Canshuurta Carruurta Minnesota: Caawinta Qoysaska iyo Carruurta!



**Dib ucelinta Canshuurta Carruurta waxay ka caawisaa qoysaska carruurta leh inay helaan nafis canshuur ah. Waxay yarayn kartaa lacagta canshuurta aad bixinayso waxayna kuu keenaysaa lacag celin haddii ay kugu soo hagaagto.**

## Ma u qalmaa Dib ucelinta Canshuurta Carruurta?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Canshuur celiska Carruurta ee Waaweyn ee u Qalmata:

- Waxaad ahayd deggane buuxa ama mid qayb kamid ah sannadka 2024 ee Minnesota (iyadoo qaarkood laga reebayo xubnaha milatariga)
- Ma tihid qof ku tiirsan qof kale.
- Waxaad leedahay mid ama in ka badan oo "carruur waaweyn ee u qalma" sida ee qeexayday IRS

## Taasi waa imisa?

Canshuur celiska ugu badan waa $1,750 ilmo kasta oo 18 jir ka yar, iyadoo aan xaddidnayn tirada carruurta la sheeganayo.

Dib ucelinta waa la dhimayaa haddii dakhligaagu ka badan yahay $36,880 ee xaas si Wadajir ah u soo Gudbiyaan ama in ka badan $31,090 ee soo gudbiyeyaal kale.

## Sidee u Codsan karaa?

Dalbo dib ucelinta Canshuurta Carruurta adiga oo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, Dib ucleinta canshuurta Carruurta iyo Qoysaska Shaqaalaha ee Minnesota.

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta canshuur celinta oo lacag la'aan ah! Booqo **www.revenue.state.mn.us** oo gal **diyaarinta canshuurta la'aanta**, fiiri sanduuqa Raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta lacag la'aan ah oo kuu dhow.

DEPARTMENT OF REVENUE

# Dib u Celiska Canshuurta Minnesota ee Carruurta Waaweyn ee Uqalma:Caawinta qoysaska iyo carruurta!



**Dib u Celiska canshuurta Carruurta Waaweyn ee U Qalma wuxuu keenayaa dhimista cashuurta dadka leh carruur. Canshuur dhaafida wuxuu yareyn karaa cashuurta lagugu leeyahay wuxuuna ku siin karaa lacag celin.**

## Ma u qalmaa Canshuurta Dib u Celinta ee U Qalanta Carruurta Waaweyn?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Canshuur celiska Carruurta ee Waaweyn ee u Qalmata:

- Waxaad ahayd deggane buuxa ama mid qayb kamid ah sannadka 2024 ee Minnesota (iyadoo qaarkood laga reebayo xubnaha milatariga)
- Ma tihid qof ku tiirsan qof kale.
- Waxaad leedahay mid ama in ka badan oo "carruur waaweyn ee u qalma" sida ee qeexayday IRS

## Taasi waa imisa?

Canshuur celiska ugu badan waa:

- $970 oo loogu hal carruur weyn oo u qalma
- $2,210 oo loogu laba carruur waaweyn oo u qalma
- $2,630 oo loogu saddex carruur waaweyn oo u qalma

Canshuurta dib u celisku wuxuu ka baxayaa haddii dakhligaagu ka badan yahay $29,500 dadka shaqsiga ah ee faylka canshuurta buuxiya iyo $35,000 dadka is qaba ee faylka canshuurta wadajirka ah buuxiya.

## Sideen U Codsan Karaa?

Dalbo dib ucelinta Canshuurta Carruurta adiga oo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, *Dib ucleinta canshuurta Carruurta iyo Qoysaska Shaqaalaha ee Minnesota*.

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta canshuur celinta oo lacag la'aan ah! Booqo **www.revenue.state.mn.us** oo gal diyaarinta canshuurta la'aanta, fiiri sanduuqa Raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta canshuurta lacag la'aan ah oo kuu dhow.

DEPARTMENT OF REVENUE

# Dib u Celiska Qoyska Shaqeeya ee Minnesota: Adiga ku shaqeynaya!



**Dib u Celiska Qoyska Shaqeeya wuxuu siinayaa qofka ama ka hooseeyo heer go'an. Dib u celiskan wuxuu yareyn karaa canshuuraha aad bixiso wuxuuna ku siin karaa lacag celis**

## Ma u qalmaa Dib u Celiska Qoyska Shaqeeya?

Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Dib u Celiska Qoyska Shaqeeya.

- Waxaad ahayd degane dhammeystiran ama qayb ahaan degane Minnesota sannadka 2024 (iyadoo ay jiraan xaalado gaar ah oo ku saabsan xubnaha milateriga).
- Ma tihid qof ku tiirsan qof kale.
- Haddii aad guursatay oo adiga ama xaaskaaga aadan aheyn muwaadin aan degganeyn, heerka canshuur celintaadu waa inuu noqdaa Guurdoon Wadajir.
- Haddii aadan lahayn carruur u qalma, adiga iyo xaaskaaga waa inaad deganaayeen gudaha Mareykanka in ka badan kala bar sannadka 2024.

## Taasi Waa imisa?

Dib u celiska Qoyska Shaqeeya waa 4% dakhligaa kasbaday ilaa $369. Dib u celisku wuu yaraadaa haddii dakhligu ka badan yahay $36,880 oo ah kuwa is qaba oo si wadajir ah u gudbinaya ama ka badan $31,090 oo ah kuwa kale ee gudbinaya.

## Sideen u codsan karaa?

Dalbo Dib u Celiska Qoyska Shaqeeya adoo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, Minnesota Child and Working Family Credits.

Waxaad sidoo kale u qalmi kartaa diyaarinta cashuur celinta ee lacag la.aanta ah! Booqo **www.revenue.state.mn.us** oo gali diyaarinta canshuurta la'aant,a fiirisanduuqa raadinta si aad u hesho adeegyada diyaarinta cashuurta bilaashka ah ee kuu dhow

DEPARTMENT OF REVENUE